

Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay: <https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>.

Janaayo 25, 2022

Ku socota: Hawl wadaagayaasha ODDS iyo Daryeel Bixiyayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: Tilmaamaha maaskare xirashada ee CDC

Xarumaha la Dagaalanka iyo ka Hortagga Cudurka (CDC) ayaa [ayaa cusbooneysiisay talo soo jeedinteedii maaskare xirashada.](#)


- Maaskaraha N95 iyo KN95 ayaa lagu talinaya in ka badan noocyada kale ee maaskaro.
- Qalabka neefsashada ee sida fiican kuugu galaya, oo ay ku jiraan N95-yadu ayaa laga helaa difaaca ugu badan. Marka si sax ah loo isticmaalo, waxay sifeeyaan inta badan haraaga qurubyada ee hawada ku jira wuxuuna yareeyaa halista isku gudbinta COVID-19.

Halkan waxaa ku qoran sida la iskaga caawiyo in maaskarahaagu ku caawiyo.

Ku neefsashada maaskaruhu wuxuu keenaa caqabad ka dhan ah dhibcaha neefsashada.

- 1** Haddii la heli karo, maaskaraha N95 ama KN95 ayaa ah kuwa u wanaagsan ee la kala dooran karo si la iskaga ilaaliyo qurubyada kuwaasi oo qaadi kara fayraska keena COVID-19. Maaskarahani sifaynta sare waxaa loogu talagalay in uu ku habboon ugu galo wajiga.
- 2** Haddii aan N95 ama KN 95 la heli karin, maaskaro maro ah oo laga kor xirto maaskaraha qalliinka ee la tuuri karo ayaa ku dara lakab dheeraad ah wuxuuna wanaajinayaa in uu si fiican wax u galo. (Ha xiran laba maaskaro oo ah kuwa la tuuri karo.)
- 3** Maaskaraha marada ah oo leh lakabyo badan ayaa joojisa dhibco ka badan maaskaraha marada ah oo leh hal lakab oo maro ah.
- 4** Xaqiiji in maaskarahaagu si fiican ugu galayo korka afkaaga iyo sankaaga, oo uusan lahayn daloolo 'gaps' agagaarka sanka iyo dhabanada.

Oregon
Health



Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa sidoo kale daabacay [talooyinka maaskare xirashada](#), oo ay la socdaan [talooyin ku saabsan doorashada maaskaro waxtar leh](#). Xirashada N95 ama KN95 ee sida fiican kuugu galaya oo ay la socdaan qaadashada tallaalka iyo talaalka xoojinta ayaa ah mid ka mid ah siyaabaha ugu wanaagsan ee aad naftaada u ilaaliso iyo dadka kuu dhow.

[Aqalka Cad ayaa ku dhawaaqay](#) in uu 400 milyan oo ah maaskaraha N95 ugu deeqi doono farmashiyayaasha iyo xarumaha caafimaadka ee dalka oo dhan dhowrka toddobaad ee soo socda gudahood.

Iyada oo shuruudaha aysan isbeddelayn waqtigani la joogo, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon (ODDS) wuxuu doonayaa in uu dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD), xubnaha ka tirsan qoyska, daryeel bixiyayaasha, iyo maamulayaasha kiiska ka dhigo kuwa ka warqaba tilmaamahani. Maaskaraha tayada sare leh, ee sida fiican u gala 'snug' waxay muhiim u yihiin hoos u dhigida faafida COVID-19, gaar ahaan nooca Omicron ee sida aadka ah la isku qaadsiiyo. Waxaan ku dhiirigelinayaa bixiyayaasha daryeelka tooska ah in ay xirtaan N95 ama KN95 si aad naftiina u ilaalisaan iyo kuwa aad taageertaan.

Waad ku mahadsan tahay taageerida caafimaadka iyo badbaadada reer Oregon ee qaba I/DD.

Sincerely,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.